**UNITED NATIONS** **NATIONS UNIES**

**UNITED NATIONS POLITICAL OFFICE FOR SOMALIA**
**UNPOS**

Nairobi, 4 Diisember 2011

Asalaamu Calaykum,

Saaxiibayaal,

Iga guddooma salaan tan ugu qaalisan haddii aad joogtaan dalka Soomaaliya gudihiisa iyo dibaddiisaba. Mar labaad , maadaama ay sanaddu dhammaan rabto waxaan idin soo qorayaa dhammaantiina waraaq si aan idinkaga xog-warramo arrimaha horumarka leh ee sida dhaqsaha badan uga socda gobolka, warbixintuna waxay ku qotontaa wixii dhacay qiyaastii labadii bilood ee ugu dambeysey ee aan warbixin idin siiyo.

Waxaan ku faraxsanahay inaan idin sheego in kaalmada gargaarka banii'aadaminimo ay hadda gaareyso dadka sida aadka ah dhibaatada banii'aadaminimo ugu hayso dalka gudihiisa. Saddex ka mid ah lixdii degmo ee horey loo sheegay inay ka jirto macluusha ayaa hadda xaaladdooda soo hagaagsanaatay , laakiinse xasillooni la'aantii weli ma dhamaanin , qiyaastii dad tiradooda ay gaareyso 250.000 oo ruux ayaa weli xaalad khatar ah ku sugan haddii aan si degdeg ah wax loogu qabanin dadkaasi. Bulshada caalamka waa inay sii waddaa dadaalkeeda, aadna u ballaarisaa , inkastoo muuqaalkii dadka macaluusha haysay aysan hadda ku soo baxeynin Joornaallada.

Sidaas darteed, waa inaan ammaan u soo jeediyaa shaqada  aadka u wanaagsan ee ay wadaan saaxiibbada cusub sida wadanka Turkiga,Ururka Islaamka Adduunka iyo Ururka Jaamacadda Carabta , kuwaasoo dadaalkoodu uusan ku ekeyn oo keliya ku deeqidda gargaarka banii'aadaminimada , laakiinse ay u soo dirayaan dadkooda Muqdisho si ay uga shaqeeyaan dalka. Waxaan fariintaan gaarsiiyey una mahadceliyey dawladda Turkiga iyo dadkeedaba, mahadcelintaasoo dhacday xilli aan booqanaayey Magaalada Ankara horrantii Bishii November.

Sida aad ogsoontihiin waxaan si joogto ah u booqanaayey Muqdisho, waxaana i cajaa'ib geliyey waddooyinka ay dadku buux dhaafiyeen ee halkaasi ka jira iyo soo kabashada  ay muujiyeen kuwa jooga caasimadda oo dib u furay dukaamankii iyo baararkii kafeega laga cabaayey. Caasimaddiina hadda waxaa ka jira derbiyo hadda la rinjiyeeyey iyo kuwo kale oo hadda ay dul saaranyihiin jaranjarooyinka si loo dayactiro guryaha iyo meelihii ganacsiga ka jirey. Laakiin dhab ahaantii caasimadda weli waxaa ka jirta khatar aad u weyn. Waxaan annagu mar walba ognahay in kuwa xag jirayaasha ah marka laga saaro meelaha ay ku gabbanayaan ee caasimadda ah ay ku kacayaan falal argagixiso nimo. Ciidamada Federaalka Dawladda Soomaaliyeed iyo kuwa Midowga Afrika ee jooga Soomaaliya(AMISOM) ayaa wada dadaal intii tabartooda ah si ay gacan uga geystaan xasilinta iyo adkeynta(Arrimaha Nabadda), laakiin maalin walba waxaan maqalnaa warar ku saabsan qaraxyo ay ku dhimanayaan dad aan waxba galaabsanin sida haweenka ku hawshoon nadiifinta qashinka si ay caasimaddu u noqoto meel wanaaagsan oo lagu noolaan karo.

P.O. Box 48246 – 00100, Nairobi, Kenya Tel: +254 (0) 20 7626815 / 7626880. Fax: +254 (0) 20 7622697

Markaan ka hadlo dhinaca amniga, ilaa iyo intii aan idin soo qoray warqaddeydii ugu dambeysay , Keenya ayaa hawlgal ka bilowday Soomaaliya gudaheeda, hawlgalkaasoo bilowday ka dib markii afduubyo is xiga laga geystay gudaha Keenya. Waxaan arkay baaqii ay sida wada jirka ah ay u wada saxiixeen Dawladda Keenaya iyo Dawladda Federaalka Soomaaliya , baaqaasoo lagu sheegay in Al-Shabaab uu yahay cadow ay labada dal wada leeyihiin, ayna habboontahay inay ula dagaallamaan si wadajir ah , waxaan kaloo arkay baaqii ka soo baxay IGAD iyo kulan madaxeedkii aan caadiga ahayn ee ay soo wada saareen wadammada Bariga Afrika. War murtiyeedkaanna waxaa lagu taageerayey hawlgalka ay u wada dhanyihiin labada dawladood (Keenya, Soomaaliya), sidoo kale war murtiyeedka wuxuu ku talinaayey in ciidamada Keenya ay ka mid noqdaan ciidamada AMISOM. Sidoo kale war murtiyeedku wuxuu codsanaayey in waddanka Itoobiya ka fikiro gacan ka geysashada dadaallada looga soo horjeedo Al-Shabaab.

Sidoo kale horumarka laga gaaray dhinaca amniga waa inuu gacan ka geystaa horumarka la taaban karo ee laga gaaray dhinaca siyaasadda. Waana inaan u tallaabsanaa si qunyar socod leh oo taxaddari ku dheehantahay markaan ka hadleyno su’aasha la xiriirta maamul goboleedyada waana inaan ku guubaabinaa inay ku soo biiraan Qoorshe Hawleedka.

Annaga haddaan nahay Xafiiska Qarammada Midoobay u qaabilsan Arrimaha Siyaasadda Soomaaliya(UNPOS) dadaalkeennu wuxuu ku wajahanyahay hirgelinta Qoorshe Hawleedka lagu dhammeynaayo xilliga KMG, Qoorshe Hawleedka wuxuu ka koobanyahay afar halbeeg :- Arrimaha Amniga, Dastuurka iyo Doorashooyinka , La xiriirka iyo Dib u Heshiisiinta iyo Maamul Wanaagga. Waxaan si degenaan leh horumar uga sameynay arrimahaan si aan u fulinno waqtigii loogu tala galay – Golaha Wasiirrada waxay ansixiyeen qoorshaha xasilloonida iyo amniga qaranka , kaasoo markii dambena loo gudbiyey Baarlamaanka, waxaa kulan yeeshay xubnaha Guddiga Wadajirka Amniga, intooda muhiimka ahna hadda way shaqeynayaan , waxayna wataan kulammadooda. Xafiiska UNPOS wuxuu fududeeyey qabsoomidda kulanka wadatashiga bulshada rayidka kaasoo ka dhacay Muqdisho, ayna isugu yimaadeen in ka badan 60 ka qaybgalayaal oo ay ka mid yihiin mas’uuliintii ugu waaweynaa ee saxiixay Qoorshe Hawleedkii , bulshada rayidka waxay ansixisay Qoorshe Hawleedka , waxayna ku baaqeen inay door muhiim ah ka cayaarayaan hirgelintiisa. Meelaha qaar waxaa laga gaabiyey horumarkii loo baahnaa. Waa inaanu dhammaanteena laban laabnaa dadaalkeenna si aan horey ugu dhaqaaqno annagoo eegayna maslaxadda dalka. Haddii xataa ay arrintaani kallifeyso inaan sameyno tanaazul aad u xanuun badan.

Maadaama horumarkii uu socdo waxaa caddaaneysa in dadkoo dhan aysan raali ka ahaaneynin go’aammada la gaaraayo, arrinta socotaahi waa arrin caafimaad qabta kana mid ah hannaanka dimoqoraadiyadda. Waa in la dhiirageliyaa sidii dadka Soomaaliyeed ay ku wada yeelan lahaayeen dood furan, codkoodana lagu maqli lahaa, gaar ahaan geeddi socodka nabadeed ee lagu dhameystiraayo qoritaanka Dastuurka, hase ahaatee waxaa jira kuwa ka baqaaya is beddelka , sidaas darteedna doonaaya inay wax u dhimaan dhammaan geeddi socodka nabadeed si ay u helaan danahooda gaarka ah. Waxaad xasuusantihiin in qoorshe hawleedka markii u horreysay lagu sheegay heshiiskii Kampala , kaasoo lagu soo af jaray is marin waagii

ka dhex jirey Madaxweynaha iyo Guddoomiyaha Baarlamaanka. Is af garadka Kampala waxaa ku qoran in Dawladda iyo Baarlamaanka si wada jir ah ula shaqeyn doonaan bulshada caalamka si loo sameeyo qoorshe hawleed wata hal beegyadiisa , waqtiga hirgelintiisa iyo habkii loogu hoggaansanaan lahaa hirgelintiisa. Is afgaradka waxaa la saxiixay 9 Juun 2011 , waxaana saxiixay Madaxweyne Sheekh Shariif Sheekh Axmed oo u saxiixay Xukuumadda iyo Guddoomiyaha Baarlamaanka Shariif Xasan Sheekh Aaden , waxaana goob joog ka ahaa Madaxweyne Musseveni ga Uganda iyo Anigaba. Is afgaradku iyo Qoorshe Hawleedka oo asagana ka mid ah qayb weyn is afgaradka ayaa waxaa markii dambe si aad ah oo loo wada dhanyahay u ansixiyey Baarlamaanka wax yar ka dib. Qoorshe Hawleedka waxaa kulan aan caadi ahayn uga dooday Xukuumadda , ka dibna waxaa saxiixay Ra'iisul Wasaaraha asagoo ka wakiil ah Hay'adaha Federaalka KMG oo uu ka mid yahay Baarlamaanka, saxiixaasna wuxuu dhacay markii la geba gebeynaayey kulankii wada tashiga ahaa ee ka dhacay Muqdisho inta u dhaxeysay 4 – 6 dii September , habkaanna wuxuu ahaa hab aad loogu dhammaa si ballaaranna wadatashi loogu sameeyey.

Si loo xaqiijiyo in xasillooni siyaasadeed iyo iskaashi u dhex maro Xukuumadda iyo Baarlamaanka ayaa is afgaradka Kampala waxaa ku qoran sameynta gole siyaasadeed kaasoo hadda lagu magacaabo Guddiga Isku Deyga Siyaasadeed ee Gobolka(Regional Political Initiative) kaasoo shaqadiisu tahay inuu kormeero dushana kala socdo sida Hay'adaha Federaaliga ugu hoggaansamayaan (Qoorshe Hawleedka). Guddigaan wuxuu ka koobanyahay Madaxweynayaasha iyo Dawladaha IGAD xubnaha ka ah iyo xubnaha Ururka Bulshada Bariga Afrika , waxaana kormeeridda kala qayb galayaa madaxdaani Xafiiska UNPOS,AU , waxaana AU da loo awood siiyey inay qaaddo tallaabo ku habboon si loo xaqiijiyo u hoggaansanaanta Qoorshe Hawleedka. Anigana waqti dhow waxaan qabanaayaa shirkii kooxda Caalamiga ee la Xiriirka iyo La Socoshada kaasoo eegi doona ilaa iyo hadda wixii laga sameeyey Qoorshe Hawleedka ka dibna soo saari doona talo jeedin. Golaha Ammaankana wuxuu si cad u caddeeyey in wixii kaalmo ah ee mustaqbalka la bixinaayo ay ku xirnaan doonto u hoggaansanaanta (loo hoggaansanaayo Qoorshe Hawleedka) iyo in tallaabo laga qaadaayo kuwa u hawlgalaaya ka hor imaanshaha geeddi socodkaan. Sidoo kale Guddigii u xilsaarnaa cuna qabataynta saaran Eritrea iyo Soomaaliya ayaa hadda awood loo siiyay inay ka fikiraan wixii cawaaqib xumo ah ee dhalan kara haddii ay timaado u hoggaansanaan la'aan la xiriirta Qoorshe Hawleedka ama loo abuuro caqabad. Farriintaani way caddahay : Qoorshe Hawleedku waa wixii la qaban lahaa mustaqbalka. Sidaas darteed **looma dulqaadanaayo qas wadayaasha doonaaya inay carqaladeeyaan Qoorshe Hawleedka**.

Inkastoo Qarammada Midoobay iyo bulshada caalamka ay bixinayaan wixii kaalmo ah oo ay karaan , hadana ugu dambeyntii arrintu waxay ku xirantahay dadka Soomaaliyeed oo la doonaayo inay kala doorataan inuu guuleysashada Qoorshe Hawleedka iyo in kale ba. Inkasta oo aan aaminsanahay in dad badan oo Soomaaliyeed iyo madaxdooduba ay oggolyihiin Qoorshe Hawleedka ayaa hadana waxaa si gaar ah ii dhiirigeliyey taageerada mideysan ee aan ka helnay bulshada rayidka ah, taageeradaasoo ay muujiyeen markii ay dhowaan ku lahaayeen kulan wada tashi ah Muqdisho. Mar waliba waxaa jiraaya kuwo aaminsan inay danta ugu jirto in xaaladdu ahaato sida ay tahay hadda. Haddaba si qeexan oo furan aan idinkagala hadlo

arrinta : UNPOS iyo bulshada caalamkaba waxay soo dhoweynayaan wixii ka qaybgal siyaasadeed iyo wax isla qabad ku saabsan, sidoo kale waxay soo dhoweynayaan kala duwanaashaha  aaraa'ada ee ujeeddadoodu tahay wax dhisid, laakiin meel looma hayo kuwa u hawlgalaaya sidii ay u qasi lahaayeen wixii horumar nabadeed ah ee laga sameeyey Soomaaliya sanadihii la soo dhaafay.

Waxaan aaminsanahay inaan dhammaanteena u hawlgaleyno isku ujeeddo qura – ujeeddadaasoo ah inaan ka dhigno Soomaaliya wadan ay ka jirto  nabad , xasillooni iyo barwaaqo. Qoorshe Hawleedku ma xallinaayo dhammaan wixii dhibaato ah ee jira , laakiin wuxuu udub dhexaad u yahay xalka , waxaanna dhammaantiina idinka rajeynayaa inaad u hawlgashaan sidaad uga shaqeyn lahaydeen hirgelintiisa.

Waad ku mahadsantihiin taageeradiina joogtada ah.

Iga guddooma Salaan Diiran

Dr. Augustine P. Mahiga